



Arrimaha carruurta ayaa diiradda lagu saari doonaa doodda dhanka guddoomiyanimada gobolka ee ka dhacaysa Dugsiga Sare ee Roosevelt.

Saddexda musharax ee xisbiyada waaweyn ee raba in ay noqdaan guddoomiyaha gobolka Oregon ee soo socda ayaa ka dooddi doona arrimaha ku saabsan carruurta marka doodda ugu horreysa ee dhanka guddoomiyanimada gobolka ee loogu talagalay doorashada 2018-ka lagu qabto goobta wax lugu soo bandhigo ee Dugsiga Sare ee Roosevelt laga bilaabo 7-8 habeenimo ee Talaadada, Oktoobar 2.

Guddoomiyaha Gobolka ee hadda Kate Brown, oo ah Democrat, ayaa waxaa ku soo biiri doona Rep. Knute Buehler, oo ah Republican, iyo Patrick Starnes, oo ka socda Xisbiga Madaxa bannaan ee Oregon. Wareyiha telefishanka KOIN ee Jeff Gianola iyo weriyaha wargeyska Portland Tribune ee Shasta Kearns Moore ayaa noqon doona xiriiriyayaasha doodda.

Carruur iyo dhallinyaro ka socota Oregon ayaa weydiin doona dhammaan su'aalaha musharixiinta iyada oo la raacayo qaab ay dejiyeen Children First for Oregon, oo ah damaanad qaadayaasha aasaasay doodda.

Dadweynaha ayaa lagu martiqaaday in ay ka soo qayb galaan iyada oo lacag la'aan ah, laakiin iyada oo sababtu tahay kuraas xaddidan oo jirta, tigidho ayaa loo baahan yahay. Si aad u codsato mid, booqo [Website-ka CFFO](#). Doodda waxaa si toos ah looga baahin doonaa telefishanka KOIN.

Maalinta Doorashadu waa Talaadada, Noofambar 6.